

Deeqo cusub oo loogu talagalay soo kabashada dhaqaalaha

Juun 02, 2022

Shaqooyinka Alberta Hadda (Alberta Jobs Now) arjiyada ayaa dib u furmaya berrito - caawinta loo-shaqeeyayaasha inay qortaan shaqaale cusub oo kor loogu qaado xirfadahooda si ay u daboolaan baahida dhaqaalaha koraya.

Si loo sii wado guusha baaxadda leh ee Qorshaha soo Kabashada Alberta (Alberta's Recovery Plan), barnaamijka Shaqooyinka Alberta ee Hadda (Alberta Jobs Now) waxa uu furi doonaa codsiyiisa saddexaad ee ugu dambeeya 3da Juun. Si wax looga qabto shaqo yaraanta imaan karta, loo-shaqeeyayaasha xaqa u leh waxay shaqaaleysiin karaan oo tababari karaan ilaa 10 shaqaale cusub oo waqti shaqo buuxa ah (full time) ama shaqo qayb ah (part time). Deeqaha waxay dabooli doonaan 25 boqolkiiba mushaharka sanadlaha ee shaqaalaha ilaa ugu badnaan \$25,000 doolar shaqaalihiiiba. Ilaa \$90 milyan doolar guud ahaan maalgelin ayaa la heli karaa.

Si loo sii taageero dadka reer Alberta ee soo food saartay shaqo la'aanta muddada dheer, loo-shaqeeyayaashu waxay heli karaan ilaa \$37,500 doolar si ay u taageeraan jagada cusub haddii uu buuxiyo qof shaqo la'aan ah ugu yaraan 27 toddobaad oo isku xigta. Loo-shaqeeyayaasha shaqaaleysiya qof naafada ah waxay xaq u leeyihiin isla deeqdan qiimaha sare leh, iyadoo aan loo eegin inta uu qofku shaqo la'aan ahaa.

Laga bilaabo Maayo ee sanadkan, in ka badan 12,600 reer Alberta ah ayaa ka shaqeynaya jagooyinka la ansixiyay ee Shaqooyinka Alberta Hadda (Alberta Jobs Now) - kuwaas oo ka soo bilowday caqabadaha masiibada ah sannadkii hore, iyada oo diiradda la saarayo sidii dadka reer Alberta dib loogu soo celin lahaa shaqada, oo u kobcay si ay wax uga qabato shaqo yaraanta hadda jirta. Noocyada shaqo ee ugu sarreeya ee lagu shaqaaleysiyo barnaamijka waxaa ka mid ah adeegayaasha cuntada iyo cabitaanka, cunto kariyeyaal, kuwa tafaariiqda iibiya, saraakiisha maamulka iyo darawallada gaadiidka.

Taageerida soo Kabashada Alberta

Shaqooyinka Alberta Hadda (Alberta Jobs Now) waa qayb muhiim ah oo ka mid ah Qorshaha soo Kabashada Alberta (Alberta's Recovery Plan) si loo abuurdo shaqooyin loona kala saaro dhaqaalaha iyadoo lagu xoojinayo shaqaalaha tababarka xirfadaha iyo deeqaha shaqada.

Si aad ugu qalanto barnaamijka, ganacsiyada ganacsiga gaarka ah ama ururada aan faa'iido doonka ahayn waa in ay u isticmaalaan maalgelinta si ay dadka reer Alberta ugu shaqaaleeyaan boos cusub ama banaan.

Shaqaalaynta cusub waa inay degan yihiin oo ka shaqeyaan Alberta waana inaanu u shaqayn loo-shaqeeyaha 90-kii maalmood ee lasoo dhaafay.

Xaqiiqooyin degdeg ah

- Loo-shaqeeyayaasha waxay awood u yeelan doonaan inay ka codsadaan qaadashada saddexaad ee Shaqooyinka Alberta Hadda (Alberta Jobs Now) alberta.ca/jobsnow laga bilaabo 9 ka subaxnimo Juun 3.
- Loo-shaqeeyayaasha qaatay shaqaale u qalma Diseembar 17, 2021 ama ka dib, taariikhda xiritaanka qaadashada hore, way codsan karaan.
- Codsiyada waxaa dib u eegis lagu sameyn doonaa looguna adeegi doonaa hadba sidey u kala horeeyaan, ilaa lacagta loo qoondeeyo.
- Deeqaha waxaa loo isticmaali karaa in lagu daboolo kharashka mushaharka ama tababarka.
- Laga bilaabo Maayo 2022, shanta warshadood ee ugu sarreeya ee codsanaya barnaamijka waxaa ka mid ah:
 - qaybta adeegyada hoyga iyo cuntada - 21.12 boqolkiiba
 - xirfadle, cilmi iyo adeegyo farsamo - 11.19 boqolkiiba
 - dhismaha - 9.46 boqolkiiba
 - Ganacsiga tafaariiqda - 7.47 boqolkiiba
 - wax soo saarka - 6.94 boqolkiiba

Xog la xiriirta

- Shaqooyinka Alberta Hadda ([Alberta Jobs Now](https://alberta.ca/jobsnow))
- Qoshaha soo Kabasha Alberta ([Alberta's Recovery Plan](https://alberta.ca/recovery-plan))

Weudiimaha warbaahinta

[Roy Dallmann](#)

587-873-7140

Xoghayaha Warfaafinta, Shaqada iyo Socdaalka

The logo for Alberta's Recovery Plan features the text "ALBERTA'S RECOVERY PLAN" in white, bold, uppercase letters. The text is contained within a white rectangular border that is partially open at the top and right sides. A yellow rectangular element is positioned at the top right corner of the white border, overlapping the text area.

ALBERTA'S RECOVERY PLAN

Alberta's Recovery Plan is a plan to breathe new life into Alberta's economy and create new opportunities for every Albertan. It's a plan to build, to diversify, and to create jobs.